



**Maxaa u soo baxay Culumada?**


Waxaa culumada u soo baxay arrimaha soo socdo:

1. Ma jiro wax heshiis iyo xeer hoosaad ah oo dhex maray xubnaha shirkadda SOMGULF oo qeexaya xuquuqda, mas'uuliyadda, xallinta khilaafka iwm ee shirkadda dhexdeeda ah.
2. Waxaa xubnaha SOMGULF dhex yaallo khilaaf sababay in ay wax iska maqli waayaan, diidayna in ay wax talo ah oo shirkadda lagu horumarinayo ama lagu badbaadinayo wadaagaan.
3. Markii ay Culimadu wax ka waydiisay qaabka xalka mushkiladda waxaa ka soo if baxay aragtiyo kala duwan oo ah:
  - A. Qeyb ka mid ah xubnaha SOMGULF waxay sheegeen in aan waxba laga qaban karin dhibaatooyinka jira, waxayna gaareen quusasho.
  - B. Qeyb kale waxay sheegeen in ay mushkiladaha wax ka qaban karaan haddii ayaga loo daayo mas'uuliyadda SOMGULF.
  - C. Qeyb kalena ra'yiga ayaa ka wareeray sidaas darteedna wax cad oo wax lagu xallin karo ma aanay sheegin.
4. Khilafkaasi kuma salaysnayn hanti la kala boobay ama la kala haysto, milkiyad layska fara marooqsaday, iyo ku daneysi gaar ah toona, laakiin khilaafkoodu waxa uu ku salaysnaa kala aamin bax ku yimid maamulka shirkadda dhexdooda, ka dib markii ay soo wajaheen culaysyo fara badan, taas oo halis galisay hantidi iyo xuquuqihii ay iyagu mas'uulka ka ahaayeen.
5. Waxa ay dhammaan qireen in aanay si wadajir ah u suuroobaynin in ay hagaajiyaan maamulka SOMGULF, khilaafkoodana xallismo sidii ay horay u ahayd.
6. Halkaa waxaa culumada uga soo baxay in ay jirto khatar weyn oo ku soo wajahan hantidii iyo mas'uuliyaddii ay gacanta ku hayeen xubnaha SOMGULF, khatartaas oo ah kuwo si toos ah qaanuun ahaan ugu imanaya hantida, sababi karayana in hantida dhammaan lala wareego, haddaan la helin xal, Waxaana kamid ah:
  - A) Dubai Islamic Bank: oo dayn ku leh SOMGULF, guryaha Twin Towers-na rahan u haysta.
  - B) Dadkii gatay guryaha GMC oo isugu jira dhawr qeybood ( qaar wada bixiyay lacagtii wax nafci ahna aan ka helin, qaar deggan, qaar lacagi ku dhimantahay, qaarna intay xirteen furayaashoodii qaateen iwm), taas oo keeni karta in ay furmaan dacwado yeesha saamayn guud.
  - C) Koronto galinta guriga oo u baahan ilaa 8.5 Malyan Dirham, meel wax loogu hayana aanay jirin.
  - D) Dad gatay guryihii Emirates City lacagtoodiina la qabo, haddii ay dacwoodaanna khatartu kusoo laabanayso guryaha kale.
  - E) Nin Sacuudi ah oo lacag ku leh guriga Zuhur ee Sharjah, rahanna u haysta.
7. Waxa ay soo gudbiyeen guddigii maamulka ee gacanta ku hayay maamulka guriga GMC, in aanay maamulka gurigaa sii wadi karin, shaqadana iska casilayaan marka uu sannadkani dhammaado, kaa oo ay dhammadkiisa naga xigaan maalmo uun sida ku cad qoraalka ku taariikhaysan 26/11/2014 oo ay u soo gudbiyeen qeybaha kala duwan ee ay qusayso arrinta guriga, gudigana soo gaaray.

Intaas iyo khatarro kale oo aan halkan lagu soo koobi Karin ayaa jira, dadka wax kala socda qadiyadaha SOMGULF-na ay garanayaan.

  
12/12/2014

  
12/12/2014

  
12-12-14